Tilmaan bixiyaha Waaxda Degmada (City Department Directory)

Degmada Bloomington waxay ku dadaashaa inay ka dhigto hawlaheeda kuwo ay haleeli karaan dadka deggan oo dhan. Waaxyuha waxay la shaqeeyaan adeegyada hawlaha tarjumidda, oo leh qaab wicitaan saddex geesood ah, si loo caawiyo dadka luqadda ingriisigoodu uu xaddidan yahay si ay u helaan macluumaadka ay u baahan yihiin. Fadlan tixraac taxanaha waaxyaha hoos ku qoran si ay kaaga caawiso cilmi baaristaada.

Animal Shelter (Hoyga Xoolaha)-952-563-4942

- Waxay ka jawaabaan dacwooyinka xayawaanka ambadka ah amaba lumay, waxayna ka badbaadiyaan dadweynaha xayawaanka halista ah.

Americans with Disabilities Act (Sharciga Dadka Mareykanka ah ee iinta leh ama curyaanka ah)-952-563-4955

- Sharciga dadka Mareykanka ah ee iinta leh amaba curyaanka ah waxaa loo ansixiyay inuu dhamaan dadka iin jir ahaan amaba maskax ahaan leh siiyo badbaadin baahsan ee xagga midab-kala-sooca ah taasoo si qoto dheer u xaddideysa hal amaba in ka badan hawlaha nolol maalmoodkooda. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Degmada Bloomington waxay leedahay shaqaale kaa caawini karaya inaad fahamto habraaca iyo xeerarka qaybta ka ah Sharciga Dadka Mareykanka ah ee Iinta leh.

Assessing (Qiimeyn)-952-563-8722

- Xafiiska Qiimeeyuhu waxuu sameeya qiyaasta qiimo suuqeedka canshuurta hantida, wuxuuna dusha ka eegaa qaabka rafcaanada, wuxuuna hantida u kala soocaa isticmaalkooda sida guryaha la dego iyo kuwa aan la deign, kuwa ganacsiga, warshadaha, iyo guryaha kala gogo'an (apartment).

Bloomington Senior Program (Barnaamijka Da'dka da'da ah ee Bloomington)-952-563-4944

- Barnaamijka Dadka Da'da ah ee Bloomington, ee ku yaalla Xarunta Bulshada Creekside (Creekside Community Center), wuxuu abuuraa jawi saaxiibtinnimo leh oo dadka da'da ah ay ugula raaxeysan karaan hawlo iyo wax qabadyo kala duwan. Waxaad wacdaa lambarka kor ku qoran si aad u heshid nuqul/koobi ku saabsan *Senior Splash*, oo ah kataloog saddex biloodle ah ee barnaamijka dadka da'da ah, adeegyadiisa iyo waxqabadyadiisa ku saabsan.

Building and Inspection (Guryaha iyo Kormeerka)-952-563-8930

- Wuxuu dib u eegaa qorsho dhismeedyada loogu talogalay la jaan qaadka qodobbada, arrimaha oggolaanshada kala qaadidda, dhismaha iyo kormeerka shaqada socota.

Bus Service (Adeegyada Basaska)-952-563-4948

- Adeegga waxaa helaya oo keliya dadka da'da ah iyo dadka curyaamiinta ah ee ku kooban degmada gudaheeda. (dadka kale way u bannaan tahay inay baska raacaan waxayse ku saleysan tahay sida loo helo).

City Cemetery (Xabaalaha Degmada)- 952-563-8729

- Xafiiska Xoghaynta Degmadu wuxuu hayaa diiwaannada xabaalaha, taasoo taariikhdeedu ka soo billaabatay sanadkii 1800-yadii. Waxay gadaan dhul waxayna kaa caawinayaan meydadka iyo qabanqaabada xabaaliddiisa.

City Clerk (Xafiiska Xoghaynta) -952-563-4925

- Xafiiska Xoghaynta Degmadu wuxuu dadka ku xiriiriyaa macluumaadka ay uga baahan yihiin dowladda hoose. Adeegyada uu qabto waxaa ka mid ah: dhulalka Xabaalaha Degmada iyo diiwaangelintooda, ruqsadaha Degmada (ay ku jiraan ruqsadda xayawaanka guri joogta ah) ruqsadda gaadiidka/ruqsadda gaari-wadaha, maamulka diiwaannada iyo cod bixinta iyo macluumaadka doorashooyinka.

City Council (Golaha Degmada) -952-563-8782

- Wuxuu adeegsadaa awoodda sharciyeed ee Degmada Bloomington wuxuuna soo saaraa qorsho siyaasadeedka Degmada. Golaha Degmada waxaa ku jira Duqa magaalada iyo lix xubnood oo xildhibaanno la soo doortay ah. Goluhu wuxuu shaqaaleeyaa Maamule Degmo oo aqoon leh, kaasoo Golaha mas'uul uga ah hawlaha maamulka degmada iyo ganacsigeeda oo dhan.

Golf Course Garoomada Ciyaaraha Golofka ee Degmada-Naadiga Golofka ee Dwan, 952-563-8702, Hyland Greens, 952-563-8868

- Garoomada golofka ee dadweynaha ee ay maamusho Waaxda Adeegyada Bulshada ee Bloomington.

Communications Division (Qaybta Isgaarsiinta)- 952-563-8818

- Waxay Kanaalka 14 ee Telefishanka degmada Bloomington ka sii deysaa barnaamijeynta dawladda, waxayna soo saartaa jariidadda soo Koobidda macluumaadka ee Degmada Bloomington, waxay gacanta ku haysaa Barta internetka Degmada, waxayna la shaqeysaa Telefishanka Awood u helidda Bulshada ee Bloomington.

Community Development (Horumarinta Bulshada)-952-563-8709

- Waxay qeexdaa jihooyinka mustaqbalka ee Degmada iyadoo loo marayo qorshoqota dheer iyo waxyaabaha looga baahan yahay aagagga, waxay dib u eegtaa codsiyada horumarinta, waxay dhowrtaa caafimaadka dadweynaha iyo nabadgelyadooda, waxay hirgelisaa guriyeynta iyo qorshayaasha dib u horumarinta dhismooyinka waxayna xiriir wada shaqayn la sameysaa unugyada kale ee dawladda. Waaxyaha soo socda waxay ku dhex yaalaan Horumarinta Bulshada: Dhismooyinka iyo Kormeerka, Adeegyada Caafimaadka Bay'adda, Ka Hortagga Dabka, Guriyeynta iyo Maamulka Dib u Horumarinta, Qorsheynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Maamulka Dekedaha.

Creekside Community Center (Xarunta Bulshada ee Creekside)-952-563-4944

- Waxaa hawlgeliya Qaybta Adeegyada Aadanaha, Xarunta Bulshada waxaa loo isticmaalaa munaasabadaha bulshada, barnaamijyada cuntada ee qadada iyo cashada, barnaamijyada nafaqada, kireynta qolalka, waxayna sidoo kale guri u tahay Barnaamijka Dadka Da'da ah ee Bloomington.

Environmental Health Services (Adeegyada Caafimaadka Bay'adda)-952-563-8934

- Waxay si joogta ah u kormeertaa maqaayadaha, goobaha cuntada lagu sameeyo, guryaha la kireysto iyo berkedaha lagu dabaasho. Shaqaaluhu waxay wax ka qabtaan cabashooyinka qaylada/codka dheer, waxyaabaha sunta ah iyo wasaqeynta hawada iyo biyaha.

Finance Department (Waaxda Maaliyadda)- 952-563-8790

- Waxay Degmada iyo Maamulka Dekedda u maamushaa adeegyada taageerada la siinayo waaxyaha Degmada. Waaxdu waxay sidoo kale dusha ka ilaalisaa adeegyada taageerada kuwaasoo mas'uul ka ah telefoonada, boostada, sawirrada, iyo hawlaha daabacaadda.

Fire Department (Waaxda Dab-demiska)- 952-563-4801

- Xubnaha 135-ta ah ee Waaxda Mutadawiciintu waxay ka jawaab bixiyaan wicitaannada qeyla dhaanta dabka ee lix saldhig dab-damis ah oo ku yaalla Degmada oo dhan. Waaxdu waxay barnaamijyo gaar ah ugu deeqdaa dadweynaha, sida Barnaamijka Qalabka Qiiqa Dareema, booqashooyin ka hortagidda dabka, iyo Toddobaadka Ka Hortagga Dabka/Booqasho Furan. Xaaladaha degdegga ah, waxaad u wacdaa 911.

Fire Prevention (Ka Hortagga Dabka)-952-563-8933

- Waxay kormeer joogto ah ku sameysaa goobaha ganacsiga, dhismeyaasha warshadaha iyo dhismooyinka qoysaska kala duwan ay deggan yihiin.si ay u xaqiijiso u hoggaansan sii socda oo loogu hoggaansamo xeerarka dabka iyo dhismooyinka Minnesota. Qaybtani waxay baartaa dhammaan dabka ka kaca Blomington si ay go'aan uga gaarto waxa sababay iyo halka uu ka soo curtay, waxayna la shaqeeyaan Waaxda Booliska si ay u baaraan cidda dabka ka danbeysa.

Housing and Redevelopment Authority, HRA (Maamulka Guryaha iyo Dib u Horumarinta)-952-563-8937

- Maamulka Guryaha iyo Dib u Horumarinta (BHRA) waxaa xukuma guddi shanxubnood ka kooban oo uu magacaabay Golaha Dawladda Degmada Bloomington. Maamulka (BHRA) wuxuu caawino guriyeyn siiyaa kuwa aan si ku filan kaalmo uga helin suuq-guriyeynta, wuxuu xiriiriyaa dadaallada Degmada si ay u badbaadiso jiritaanka xaafadaha hadda jira waxayna sare u qaaddaa horumarinta iyo dib u horumarinta kor u qaadaya Bloomington. BHRA waxay leedahay barnaamijyo kala duwan si ay guul uga gaarto himilooyinkeeda ay ka midka yihiin kaalmada la iska siiyo kirada, dib u dejinta guriyeynta, kaalmo la siiyo dadka marka ugu horreysa guryaha iibsanaya iyo horumarinta kale iyo barnaamijyada dib u horumarinta. Maal gelinta barnaamijyadaan waxay ka timaaddaa ilaha dowladda dhexe, gobolka, deegaanka iyo dowladda hoose

Human Resources (Waaxda Shaqaalaha)-952-563-8710

- Waxay xiriirisaa carbinta iyo shaqaaleynta, waxay sameysaa wadahadal, waxay maareysaa manaafacaadka shaqaalaha, magdhawga iyo kala shaandheynta shaqooyinka ee loogu talogalay shaqaalaha Degmada.

Human Rights Commission (Guddiga Xuquuqda Aadanaha)-952-563-8733

- Wuxuu Golaha Degmada iyo Guddoonka Waxbarashada Degmada Bloomington kala taliyaa arrimaha xuquuqda aadanaha. Guddigu wuxuu kaloo aqoonsan yahay xubnaha bulshada dadaalkooda sarreeya ee dhinaca xuquuqda aadanaha. Guddiga sagaalka xubnood ah ee Xuquuqda Aadanuhu waxay badanaa kulmaan Isniinta saddexaad ee bil kasta saacaddu Markay tahay 5:30 fiidnimo. Dadweynaha waxaa lagu dhiirri gelinayaa inay ka soo qeyb galaan. Dadka deggan waa inay soo wacaan lambarka kor ku qoran haddii ay dareemayaan in lagugu dhex takooray Bloomington

Human Services Division (Qaybta Adeegyada Aadanaha)-952-563-4944

- Waxay fidiyaan adeegyada ay heli karayaan dadka soo haajiray, dhallinyarada dakhligoodu yar yahay, qoysaska iyo dadka da'da ah iyo dadka iinta leh amaba curyaamiinta ah. Barnaamijyada waxaa ka mid ah: Adeegyada Basaska ee Bloomington, Xarunta Macluumaadka Xiriirinta-qoyska, barnaamijyada nafaqada, hawlaha bulshada iyo macluumaadka mutadawiciinta.

Ice Garden (Garoonka Barafka)-952-563-8842

- Rinks waxay u furan yihiin dadweynuhu inay barafka ku dul ordaan iyo in ay ku ciyaaraan ciyaarta Hokiga barafka. Intaasi ka sokow, casharada baraf ku dul orodka ee carruurta iyo dadka qaan gaarka ahba waxaa dhiga macallimiin ku xeel dheer.

Legal Department (Waaxda Sharciyada)-952-563-8753

- Waxay qaabilsan tahay dambi ku oogidda dambiileyaasha iyo denbiyada maxkamadaha.

Parks and Recreation Department (Waaxda Jardiinooyinka/Beeraha lagu Nasto & Jimicsiyada)-952-563-8877

- Waxay tas-hiilaadka ugu wanaagsan siisaa muwaadiniinta iyadoo u maraysa tas-hiilaad waaweyn, barnaamijyo, munaasabado iyo wadashaqeyn. Waxay maamushaa Xarunta Xayawaanka Biyaha Qoyska Bloomington iyo Xeebta Balliga Bush, waxayna xiriirisaa Xafladaha la qabto xilliga Xagaaga, Jiilaalka, Hawlaha la xiriira barnaamijka Bloomington Bloomington waxay Jeceshahay hawlaha Caruurteeda, barnaamijyada dhalinyarada ee xilliga xagaaga iyo ciyaaraha dadka waaweyn.

Planning Devision (Qaybta Qorsheynta)-952-563-8920

- Qaybta Qorsheynta iyo Horumarinta Dhaqaaluhu waxay mustaqbalka Bloomington ku hoggaamisaa iyadoo adeegsaneysa daraasad iyo xakamaynta aagagga. Qaybtu waxay dib u eegtaa ayna diyaarisaa talooyinka laga bixiyey codsiyada horumarinta, dib-u-seereynta, isticmaalidda oggolaanshaha iyo kala duwanaanshaha.

Police Department (Waaxda Booliska)-952-563-4900

- Waxay u heellan tahay inay bixiso adeegyo boolis oo aqoon ku dhisan iyagoo la kaashanaya bulshada. Waxay hawl gelisaa barnaamijka Ilaalada Xaafadda, Habeenka Bannaan u baxa Qaranka, Akadamiyada Muwaadiniinta, Sahmiyayaasha Booliska, iyo adeegyada u Diyaar Garowga Arrimaha lama Filaanka ah ee Degmada. Xaaladaha degdegga ah waxaad wacdaa 911.

Public Health (Caafimaadka Dadweynaha)-952-563-8900

- Waxay kor u qaaddaa hawlaha iyo dhaqannada si ay kaaga caawiso in aad caafimaad ugu waarto. Baaxadda adeegyadiisa iyo barnaamijyadu aad bay u qota dheer tahay, iyadoo daryeel caafimaad u fidineysa dadka da' kasta leh. Waxay bixisaa adeegyo caafimad, adeegyo caafimaad dadewyne oo guud, adeegyo caafimaad qoys, kor u qaadista caafimaadka dadka da'da ah iyo kor u qaadista caafimaadka guud

Public Works (Hawlaha Guud)-952-563-4581

- Waxay hanataa hawlaha guud (oo ay ku jiraan waddooyinka, qaadista barafka, bullaacadaha, buundooyinka, qaabka gaadiidka), waxay bixisaa biyo nadiif ah oo la cabbo, waxay maamushaa barnaamijka nadiifinta dhinacyada waddooyinka ee sanadlaha ah waxayna hagaajisaa qalabka Degmada ee lagama maarmaanka ah si ay adeegyo ugu qabato dadweynaha

Traffic and Transportation (Gaadiidka iyo Isgaarsiinta)-952-563-4913

- Waxay maamushaa in ka badan 4,000 ee nalalka waddooyinka, 130 nalalka kala haga gaadiidka iyo 10,000 calaamadaha waddooyinka ah. Qaybtu waxay la shaqeysaa dadka deggan iyo hawlaha xagga awood u helidda guryaha iyo koontaroolidda nalalka kala haga gaadiidka. Waxay sidoo kale matashaa sidii xiriiriye wada shaqayn ee awoodda sharciga dadweynaha ee waddooyinka deegaanka iyo gobollada, waddooyinka lagu socdo, wadooyinka baaskiillada iyo adeegyada kala gooshidda.

Utilities (Tas-hiilaadka)-952-563-8777

- Waxay hawl gelisaa warshadda sifeynta biyaha, waxay dayactirtaa qalabyada goobaha, waxay u adeegtaa macaamiisha waxyna maamushaa goobaha. Waxay ka shaqeysaa gundhigga maalintii oo idil iyo maalin kasta, qaybtu waxay hawl gelisaa biyo nadiif oo badhax la',oo ay ku sameyso warshadda biyho sifeynta waxayna ku soo furaan tubbadaada. Xaaladaha degdegga ah, waxaad wacdaa 952-563-4905.